## SUURAT AL-INSHIQAAQ:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Marka Samadu jeexjeexanto ( qiyaamada )*

2. *Oy Eebe addeecdo waana xaq addeeciddiisunee*

3. *Marka dhulka la fidiyo ( qiyaamada )*

4. *Oo uu soo tuuro waxa ku hoos jira, kana madhnaado*

5. *Oos Eebe addeeco waana xaq addeeciddaasina ( wuxuu la kulmi ruux walba camalkiisa )*

6. *Dadow waxaad u dhibboon ood u camalfali xagga Eebe, waadna la kulmi*

7. *Ruuxiise Kitaabkiisa ( fiican ) midigta laga siiyo ( waa mu'minkee )*

8. *Waxaa la xisaabin xisaab fudud*

9. *Wuxuuna ku noqon ciddiisii ( Jannada joogtay ) isagoo faraxsan*

10. *Ruuxiise Kitaabkiisa laga siiyo gadaashiisa ( waa dadka xune )*

11. *Wuxuu u yeedhan halaag*

12. *Wuxuuna gali Naarta Saciira*

13. *Maxaa yeelay markuu dadkiisii dhexjoogay yuu kibirsannaa ( adduunkii )*

14. *Wuxuuna malaynhayay inuusan Eebe u soo noqonaynin ( qiyaame )*

15. *Saas ma ahee Eebe waa arkaa*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Qudrada Eebe iyo Awooddiisu wax walba waa ka sarraysaa, maxaa yeelay

isagaa wax walba ahaysiiyay wax awooddiisa ka baxsanna ma jiro, laba waddo umbaana jira, ruux walbana wuxuu qaadi tuu u camalfalo.
Rasuulka Eebana “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee “ wuxuu yidhi: Idinku waxaad falaysaan camallo aan la aqoonin, waxayna u dhawdahay inuu u soo noqdo kii maqnaa reerkiisii oo uu farxo ama naxo.

Waxaa wariyay Dhabaraani

***16. Waxaan ku dhaartay “ buu yidhi Eebe “ Midabka qorrax dhaca***

***17. Iyo habeenka iyo wuxuu qariyay***

***18. Iyo dayaxa markuu nuurku buuxsamo***

***19. Ee dadow waxaad koraysaan xaalado kala duwan***

***20. Dadka maxaa u sugnaaday oy la rumayn waayeen ( xaqa )***

***21. Marka Quraanka lagu akhriyana ayna u sujuudaynin***

***22. Saas ma ahee kuwa gaaloobay waxay beenin ( xaqa )***

***23. Eebana waa ogyahay waxay qarsan***

***24. Ugu bishaaree caddibaad daran***

***25. Hase yeeshee kuwa rumeeyay xaqa camal fiicanna falay waxay mudan ajri aan go’aynin***

Qur’an 84:1-25

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***
Eebe wuxuu ku dhaartay in dadku mari xaalado kala duwn, sida: yarida, duqnimada, caafimaadka, cudurka, hodontinimada, saboolnimada, geerida iyo nolosha, haddana saas dadku isago arka yuu xaqa beenin oo leexan, ruuxiise camal fiican la yimaadda laga ma nusqaamiyo ee wuu la kulmi isagoo dhan, dadkuna shaqay ku dhibboon, waxaana la huraynin la kulanka Eebe.